

Waraaqda Oggolaanshaha ee Gaaban si Looga Qaybgalo Cilmi-baadhis

Waxa lagu weydiisanayaa inad ka soo qaybgashid daraasad cilmi-baadhis. Ka-hor inta aanad oggolaan inad ka qaybgashid daraasadda, waa muhiim inad daraasadda ka heshid sharaxaad cad oo ah luqad ad fahmi kartid. Halkan hoose waxa ku taxan waxa ad oggolaanaysid marka ad saxeexdid waraaqdan oggolaanshaha.

Turjubaan ka mid ah baadheyaasha wada daraasadda ama ka tirsan wakiiladooda ayaa kuu sharaxay waxyaabahan:

1. ujeedooyinka cilmi-baadhisti, habraacyada, iyo mudda ay socon doonto cilmi-baadhistu;
2. wixii ah habraacyo ah tijaabin;
3. wixii ah halisyo la sii arki karo oo caqli-gal ah (halisyada suurtogal ah ee hadda la yaqaano), raaxo-daroyinka iyo anfacyada cilmi-baadhisti
4. wixii ah habraacyo ama daweyn ah beddelaad anfac leh; iyo
5. sida qarsoodinimada loo illaalin doono.

Haddii ay khuseyso daraasaddan, waxa wax lagaaga sheegay waxyaabahan:

1. wixii ah magdhow la heli karo ama la-tacaalis caafimaad haddii ad ku dhaawacantid cilmi-baadhisti;
2. suurtogalmimada halisyo aan hore arki karin (halisyo aan hadda la aqoon);
3. xaaladaha u baadhuhu ku joojin karo ka qaybgalkaaga;
4. wixii ah kharashyo adiga ku soo gaadhaya;
5. waxa dhacaya haddii ad go'aansatid inad joojisid ka qaybgalka;
6. goorta laguu sheegi doono natijjooyin cusub oo laga yaabo inay saameeyaan oggolaanshahaaga inad ka qaybgashid; iyo
7. inta qof ee ku jiri doona daraasadda.

Waxa laguu sheegay inad la xidhiidhi kartid _____, oo ah Baadhaha Koobaad (Principal Investigator) (PI) oo ad ka wici kartid _____, haddii ad qabtid su'aalo ku saabsan darasaadda ama dhibaatooyin ku qabtid daraasadda waxa kale oo ad la xidhiidhi kartaa Xafiiska Maamuulka ee Guiddida Dib-u-firinta (Allina Health Institutional Review Board Administration Office) oo lambarkoodu yahay 612-262-4920 haddii ad qabtid wax su'aalo ah oo ku saabsan xuquuqdaada ka-qaybgale cilmi-baadhis ahaan, daraasadda cilmi-baadhisti, ama wixii ad sameyn lahayd haddii ad dhaawacantid.

Waxa laguu sheegay in ka-qaybgalkaaga cilmi-baadhistan u yahay ikhtiyaar iyo in aan lagu ganaaxi doonin ama aanay kaa lumi doonin anfacyo haddii ad diidid inad ka qaybgashid ama go'aansatid inad joojisid ka-dib marka ad oggolaatid inad ka qaybgashid.

Haddii ad oggolaatid inad ka qaybgashid, waxa laguu sheegay in lagu siin doono nuql ama koobi ah dokumentigan oo saxeexan iyo koobis qoraal ah oo ku saabsan cilmi-baadhisti oo ah luqadda Ingiriisiga.

Saxeexidda dokumentigan macnaheedu waxa weeye in daraasadda cilmi-baadhisti, oo u ku jiro macluumaadka sare, laguugu sharaxay af ahaan, iyo inad si ikhtiyaar ah u oggolaatay inad ka qaybgashid.

Saxeexa Ka-qaybgalaha/Wakiilka Sharci ee Amar Haysta/Waxa la Isu Yahay

Taariikh & Wakhti

Saxeexa Markhaatiga
Somali

Taariikh & Wakhti